

# Maxaan sameeyn karaa si aan kuu caawiyo?



## Social Cohesion Guide

### Waan ka mid nahay

Waxaan dhammaanteen leenahay door aan ku dhisno social cohesion. Taasi waxaa ka mid ah ku caawinta dadka inay dareemaan inay ka mid yihiin, oo lagu daray, ay noqon karaan nafsadooda oo ay ka qeybqaataan bulshada. Badankeenu waxaan tan sameynaa inagoon ogeyn. La hadalka dariskeena, tabarucida, ama ka qeybgalka munaasabada bulshada waa wax kasta oo abuura dareenka ka mid ahaanshaha iyo ka qeybqaadashada. Xittaa goobaheena shaqada, waxay u badan tahay inaan sameeyno waxyaabo dhisaya social cohesion iyadoo loo marayo ficilo fudud sida la qaadashada kafee iyo qado shaqaalaha cusub.

Waxaa laga yaabaa inaan ka qeyb ka nahay qoys, dugsi, goob shaqo, koox ciyaartooy ama Masjid – ama laga yaabo inaan baraneyno luuqad cusub ama la wadaageyno hiwaayadaha dadka kale. Bulsho kasta oo aan ku dhex jirno, waxaad dareentaa wanaag hiiddii aad ka mid noqono, in aad dareento ka mid ahaansho, in aad naftaada noqoto oo aad wax ka mid noqoto.

Dhammaanteen waan kala duwannahay, laakiin waxaan rabnaa inaan isla socono, u dabaaldagno kala duwanaanshaheena oo aan ixtiraamno dadka kale markii la is-khilafo. Tani waa muhiim sababtoo ah ma ahan in qof walba uu dareemo inay noqon karaan cida ay yihiin ama aaminsanyihiin in codkooda la maqli doono.

Waxaan nahay wadan aad u kala duwan oo ay ku nool yihiin bulshooyin badan oo kala duwan, waxaana loo baahan yahay in la helo qaabab aan isku dhegeysanno oo aan is maqalno. Waxaan rabnaa inay naga go'naato inaan fahamno kala duwanaanshaheena iyo awoodaheena oo aan ka shaqeyno waxa na mideeya iyo waxa isku keyn soo dhaweeyo.

## Ka mid ahaanshaha

### – waxa ay u egtahay

Bulsho meesha dadka si fiican isku fahmaan, waan is naqaanaa, ogaano dariskeena, dareeno goob shaqo loo dhanyahay, oo carruurteena dareemaan inay ka qeyb yihiin bulshooyinkeena oo aan naqaano meesha loo aado caawin markii aan u baahannahay. Waxaan dareenaa inay noo suurto galeyso inaan la hadalno dadka aan caadi ahaan ula hadlin, aan ka hadalno markii aan maqalno dad dhahayo waxyaabo takoorid ah, oo aan xor u nahay inaan la wadaagno cida aan nahay, halka aan ka nimid, iyo sida aan waxyaabaha u sameeyno. Markii ay dhibaato jirto qofna gadaal ugama tagno – oo qof walbaa lagu daro.

## Dhisida ka mid ahaansho badan (Kordhinta ka mid ahaanshaha)

### – waxa aad sameeyn kartid

Haddaba, maxaan sameeyn karnaa si aan ugu caawino dad badan ka mid ahaanshaha, so dhoweynta kala duwanaanshaha, dareeno isku xirnaan, ka qeyb qaadano, aamino dadka kale iyo in aan dareeno ixtiraam?

#### Waan ka mid nahay

- waxay aqoonsataa oo wax ka qabataa dhaqanka takoorida, xeerarka iyo hab dhaqamada.
- waxay ka caawisaa dadka iyo ururada inay si wanaagsanaadaan.
  - la yeelano wada sheekeysii dhiiran qof muujinayo hab dhaqan takoorid ah. Macluumaadka ku jira websaydka Komishanka Xuquuqaha Aadanaha ayaa noqon kara mid waxtar leh, sida [Ka Jawaabida Cunsuriyada](#).
- waxay ka caawisaa dadka iyo ururada inay si wanaagsanaadaan.
  - waxay ka raadisaa tababar ururkaaga, golaha deegaanka ama dhinaca NGO-ga oo la dagaalanka takoorida iyo la wadaagida aqoontada saaxibada, qoyska iyo asxaabta shaqada.


- waxay tixgelisaa halka badelada sharci dejinta, xeerka looga baahanyahay in lagu taageero ka-hortagga takoorka.
  - waxay siisaa gudbin xeerarka iyo sharci dajinta inta lagu jiro wada tashiga dadweynaha.

## Soo dhoweynta kala duwanaanshaha, dareemida ixtiraam

- waxay tixgelisaa haddii, goobtaada shaqada ama ururka, aad isticmaali karto, bixin karto ama aad ka codsan kartid maalgelinta lagu naqshadeynayo barnaamij ama adeeg wax looga qabanayo takoorida.

## Dareemida iskuxirnaanta

- waxay bixisaa hogaamin iyo isla u qaadida caadooyinka bulshada loo wada dhanyahay.
  - uma baahnid inaad ahaatid maareeye koox si aad u noqotid hogaamiye. Waxaad muujin kartaa hogaamin firicoon adiga oo si furan u qiimeynayo siiyaabaha kala duwan ee asxaabtaada, saaxibada iyo dadka aad taqaanid. Tani waxay noqon kartaa iyada oo qofka loogu qiro af ahaan, lana siiyo boos iyo waqti ay ku hadlaan oo ku dhageystaan waxa ay dhahayaan.
- sii wad abuurista fursadaha wada hadalka ee bulshooyinka kala duwan.
  - waxay la xiriirtaa dariska cusub oo la sameysaa asxaab cusub shaqsiyaadka ka socdo bulshooyinka kala duwan. Waxaad kula kulmi kartaa dhacdooyinka deegaanka ama aqoon isweedaarsiga onleenka iyo hui.
- xeerka la naqshadeynta tallada bulshada kala duwan. (Isa naqashey xeer ku dhisan aragtida bulshada).
  - haddii aad tahay xeer soo saare, tixgeli inaad isticmaashid illaha ee websaydka [Mashruuca Xeerka DPMC](#) si aad u hormariso qorshaha ka qeybgelinta adag.



- waxay sare u qaadaa fahamka dhaqamada kale iyo aqoonsiyada.
  - daji munaasabada Maalinta Dariska ee aaga deegaankaaga sida qadada iyo shaaha galabtii ee la wadaago.

## Ka qeybqaadashada

- ka qeybqaado howlaha bulshada kala duwan oo abuur aaminaad xoogan, sareyso iyo xiriiro joogta ah.
- ka qeybgal munaasabadaha bulshada iyo dabaaldagyada oo raadi warixin ku saabsan dhacdooyinka iyo abaalmarinada. Waxaad ka heli kartaa howlaha bulshada aagaaga adoo isticmaalayo Neighbourly, EventFinda ama wargeyska degaankaaga.
- noqotid mid wax ka og taariiqda NZ iyo Heshiiskii Waitangi oo aad kala qeybgashid wax badan Te Reo me ngā tikanga Māori.
- baratid Te Reo adigoo isticmaalaya app-yada onleenka bilaashka ah sida Kōrerorero, Kupu iyo Ako Tahi ama iskaga diiwaan geli koorsada Te Wānanga o Aotearoa, booqo bandhigyada taariiqda ee madxafka deegaankaaga, ama ka amaaho maktabada deegaankaaga buugaagta taariikhda NZ.

